Heerarka iyo Imtixaanada Barashada Gobolka

Waa maxay "heerarka barashadu"?

Heerarka Barashada K–12 ee Gobolka Washington waxay qeexaan waxa ay tahay ardayda oo dhan inay ogaadaan oo ayna awoodaan inay sameeyaan heer fasal oo kasta.

Maxa aynu ugu baahannahay?

Heerarka barasho oo adag waxay ardayga uga baahan yihiin inay uga fikiraan si dhab iyo hal-abuur ah waxa la dhigayo—halkii ay ka xafidi lahaayeen—si ay markaa diyaar ugu noqdaan shaqooyinka, kuuliyadda, iyo nolosha kadib dugsiga sare.

Waa maxay meelaha la dhigto ee leh Heerarka barasho?

- Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida
- Xisaabta
- Sayniska
- Cilmiga Bulshada
- Farshaxanka
- Teknoolajiga Waxbarasheed
- Caafimaadka iyo Dhisnaanta
- Bey'adda Midaysan iyo Joogtaynta
- Luuqadaha Adduunka
- Ku Fiicnaanta Luuqadda Ingiriisida

Sidee loo sameeya?

Heerarka barashada waxa si taxadar leh u sameeya khabiirro ka kala socda gobolka oo dhan waddanka, iyada oo aragtidooda ay ku darayaan barayaasha, waalidiinta, iyo dadwaynaha.

Sidee sida badan wax looga beddelaa Heerarka barashada?

Heerarka waxa wax looga beddelaa si wakhti kusalaysan si loo hubiyo inay la jaanqaadayaan filashooyinka isbeddelaya ee kuuliyadaha iyo shaqaalaha.

Maxaynu u leenahay imtixaanada gobolka?

Xogta guusha ee ardayda, dugsiyada, degmooyinka, iyo gobolka waxay caawisaa macalimiinta in ay wanaajiyaan barashada. Buundooyinka imtixaanka waxay ku caawisaa go'aansashada dhaqamada waxbarashada iyo aqabyada sida wanaagsan u taageero fahamka ardayga ee heerarka barashada. Buundooyinka waxaa loo isticmaalaa in lagu wanaajiyo tilmaamaha. Natiijooyinka waxay aqoonsadaan halka ardayda ay ku wanaagsanyihiin iyo halka ay ugu baahanyihiin taageero dheeraad ah si markaas loo buuxiyo filashooyinka heerka fasalka.

Bundooyinka ardayga sidoo kale waxay siiyaan qoysaska macluumaad qiime leh oo ku saabsan sida wanaagsan ee ilmahoodu yahay iyo halka laga yaabo in looga baahdo caawin dheeraad ah.

Imtixaanista gobolka oo dhan waa muhiim sababtoo ah waxay caawisaa hubinta dhammaan ardayda dugsiyada bulshada, dhibaato malahn halka ay ka aadaan dugsiga, ay ka helaan waxbarasho tayo leh.

Ma wax sharcigu dhigayaa?

Shuruucda gobolka iyo federaalku waxay dhigayaan ardadya in lagu imtixaano:

- **Farshaxanka luuqadda Ingiriisida iyo xisaabta:** Fasallada 3 ilaa 8 iyo dugsiga sare
- **Sayniska:** Fasallada 5, 8, iyo 10

Si aad u ogaato imtixaanada sharcigu farayo si looga qalinjabiyo dugsiga sare, fadlan booqo www.WAtesting.com.

Baro wax badan!

Heerarka Barashada

bit.ly/StateStandards
ama iimayl u dir CoreStandards@k12.wa.us

Baro wax badan!

Imtixaanista Gobolka

www.WAtesting.com
ama iimayl u dir StateTesting@k12.wa.us

Sheeg Heerarka Barashada & Imtixaanka

10 XAQIIQOOD EE U SAREEYA EE KU SAABSAN HEERARKA BARASHADA K-12 IYO QIIMEYNTA WASHINGTON

Sabakta #1

Waxyaabaha saxda ah

Heerarka barashada gobolka Washington oo luuqada fanka Ingiriiska iyo xisaabta, iyo qiimeynaha waafaqsnb ee Balanced Smarter, waxaa loo qorsheeyay in ay u diyaariso ardayda kulliyada, shaqada iyo nolosha.

Sabakta #2

Xirfadaha aduunka dhabta ah

Heerarka iyo qiimeynaha waxay diirada saaraan xirfadaha aduunka dhabta ah sida xalinta dhibaatada, qoraalka fikirka dhabta ah. Ardayda waxaa la weydiiyaa in ay sameeyaan wax ka badan buuxinta xaalada wanaagsan ee imtixaanka su'aalaha badan lakala doorto. Waxay hadda leeyihiin fursada lagu muujinaayo shaqadooda, qor oo sharax jawaabahooda sida qeyb nidaamka imtixaanka.

Sabakta #3

Ku xiran fasalka

Imtixaanka wuxuu u dhigmaa xirfadaha iyo waxyaabaha ardayda ay baranayaan oo ku dhaqmayaan fasalka maalin walba. Heerka fasal walba wuxuu leeyahay hadafyo cad, mudnaanta la siiyay oo sharaxo waxa ah in ardayga ogaado oo fahmo dhammaadka sannadka dugsiga.

Sabakta #4

Xiritaanka meelaha banaan

Qiimeynta waxay caawisaa aqoonsiga gaarista meelaha banaan oo u ogolaato dugsiga degmooyinka iyo gobolka in lagu meeleeyo illaha halka inta badan looga baahanyahay.

Sabakta #5

Imtixaamida waa hal cabir kaliya ah

Imtixaanka gobolka waa mid ka mid ah dhowr tilmaamayaal, marka lagu daro kaararka wargelinta, jawaabta macalinka iyo shaqada fasalka ee lagu isticmaalay in lagu kordhiyo sawir buuxo ee hormarka ardayga ah ee dugsiga.

Sabakta #6

Ku xirnaanta waxbarashada sare

Jaamacadaha Washington, kulliyada, kulliyadaha bulshada waxay isticmaalaan buundooyinka imtixaanka Smarter Balanced ee ardayda dugsiga sare ee meeleynta heerka koorsada.

Sabakta #7

Illaha macalinka

Iyada oo la isticmaalayo nidaamka qiimeynta Smarter Balanced, macalimiinta waxay ka geli karaan illaha maktabada dhijitaalka ah oo u isticmaalaan si joogta ah, ama kumeelgaar ah, qiimeynaha waxay caawinayaan raadraaca oo waxay taageeraan horumarka ardayda oo sannadka oo dhan ah.

Sabakta #8

Ka qeybgalka macalinka

Macalimiinta Washington waxay ka qeybgalayeen tallaabo walba oo ah habka lagu horumarinayo nidaamka qiimeynta Smarter Balanced, laga bilaabo horumarinta walxaha imtixaanka, ee hagaajinta heerarka guusha, ee isku shaandheynta aqabyada maktabada dhijitaalka ah.

Sabakta #9

Natiijooyin dhaqsida ah

Gu'ga 2016, buundooyinka imtixaanka shaqsiga ayaa loogu heli karay degmooyinka gudaha labo ilaa sadex isbuuc ee buuxinta ardayga ee dhammaadkooda sannadka, ama qiimeynta, imtixaanada. Taasi waxay caawisaa in macalimiinta ay horumariyaan barashada.

Sabakta #10

Si sahlan loo heli kara

Imtixaanada Smarter Balanced waxaa loo naqshadeeyay in ay qaabisho ardayda oo dhan, oo ay ku jiraan kuwa naafadda ah iyo ardayda luuqada af Ingiriiska.